# Waxyaabaha laga filayo Booliska Jawaabta ka bixinaya Dembiga Eexda

Waxaad u baahan tahay in aad ogaato si loo gaaro go'aano laga warqabo oo ku saabsan la macaamilka booliska marla la soo sheegayo dembiga eexda.

Oregon Department of Justice's
CIVIL RIGHTS UNIT

# Booliska

Waxaanu istimaalnaa erayga “booliska”(“police”) dokumentigani.

Waxaan ula jeednaa in dhammaan hay’adaha dhaqangelinta sharciga ee dhammaan heerarka hay’adeed, oo ay ku jiraan madaxda booliska iyo saraakiishooda, mas’uuliyiintooda iyo ku xigeennada, ciidamada iyo saraakiisha badbaadada ee la dhaariyay. Dadkani waa saraakiil la dhaariyay (ma aha dad shacab ah) oo fuliya hay’adaha dhaqangelinta sharciga ee magaalada yar/magaalada weyn (madaniga ah) waaxyaha booliska, xafiiska mas’uulka, Booliska Gobolka Oregon, waaxyaha booliska ee jaamacadda.

# Sharciga Oregon Ayaa Sheegaya in Boolisku leeyihiin Waajibaadyadani Aasaasiga ah

- OR Const, Art I § 42 (1): Dadka dhibbanayaasha ah ula dhaqan **si sharaf iyo ixtiraam leh**
- OACP Xeerka Anshaxa: Waajibaadka aasaasiga ahi waa in loo **adeego bulshada**
- OSSA: Kordhi **badbaadada bulshada**
- Hawsha SSP: Si loogu adeego Gobolka Oregon oo leh shaqaale kala duwan**oo ay ka go'an tahay ilaalinta dadka**, hantida, iyo ilaha dabiiciga ah.
- Sida ku cad ORS 181A.080: Awoodaha iyo waajibaadyada:
  - **hirgeli dhammaan sharciyada dembiyada**
  - **ka hortag dembiga**
- ORS 147.380: Boolisku **waa inay** dhibbanayaasha **dhacdooyinka eexda** u gudbiyaan adeegyada dhibbanaha ee degaanka oo loo qalmo ama khadka

# Sharciga Oregon Ayaa Sheegaya In Boolisku Ay:

- Xubnaha ka tirsan bulshada ula dhaqmaan si sharaf iyo ixtiraam leh.
- Buuxiyaan baahiyaha dhanka gelitaanka, marka la codsado.
- Helaan turjubaan si ay xiriir kuula sameeyaan adiga, marka la codsado (Qoddobka VI ee CRA of 1964, Qoddobka III ee ADA).
    - Ha u isticmaalin qofka dhibbanaha ama xubin ka tirsan qoyska markhaatiga turjubaan ahaan.
- Ku weydiinin xaaladaada muwaadinimo, dalka aad ka soo jeedo, ama xaaladaada muhaajirnimo, haddii aysan ahayn iyada oo ah qayb laga maarmaan u ah baaritaankooda dembiga (ORS 181A.823).
- Haddii aad tahay 15 jir ama ka weyn, kuu oggolaadaa in aad yeelato qof aan ahayn markhaati oo da'diisu tahay 18 jir ama ka weyn uu kuu raaco wareysi kasta (ORS 147.425).
- Baaraan dembiyada.
- Hirgeliyaan sharciyada dembiyada.
- Daacad ka ahaadaan xaalada baaritaankooda, ilaa inta aysan waxba u dhimayn baaritaankooda.
- U sheegaan dhibbanayaasha fal dembiyeedka xuquuqdooda (OR Const, Art I § 42 (1) iyo ORS 147.417).

# Boolisku Waa Inay Baaraan Dembiyada Eexda

- Ma aha in aad caddeyso kiiska kuu gaarka ah.
- Ma aha in aad leedahay qof la tuhunsan yahay.
- Boolisku waa in ay baaraan cidda, waxa, goorta, halka, sababta, iyo sida.
- Boolisku waxay ku weydiin doonaan iyo su'aalo kale.

# Baaritaannada Booliska Waa Inay Ku Jiraan

- Qirida waxyeelada aad la kulantay
  - Erayada sida, “Waan ka xumahay in tani kugu dhacday. Wax caadi ah maaha.” waa kuwo muhiim ah
- Ka qayb galka baahiyaha caafimaad ee dhibbanaha(yaasha), markhaatiga(yaasha) iyo dembiilaha(yaasha)
- Sugida iyo ilaalinta caddeynta, oo ay ku jiraan:
  - ururinta caddenta jir ahaaneed
  - caddeynta sawir qaadid
  - u dirista caddeynta si loogu baaro shaybaarka dembiyada
- Ka soo qaadista warbixinnada dhinacyada oo dhan
- La hadalka xaafadda
  - Si loo raadiyo caddeyn dheeraad ah (kaamarooyinka, astaamaha, calaamadaha u dhow, waxyaabaha la tuuray?)
  - Si loo wareyso markhaatiyaal dheeraad ah (markhaatiyaashu waxay noqon karaan goob-joogayaal ah, markhaatiyaal dhegaha wax ka maqlay, ama haya xog taariikhi ah oo khuseysa)
- Sameynta in wax la xidho ama soo saarida qoraalka ku xadgudubka sharciga ‘citation’ haddii boolisku dejiyo sabab macquul ah oo lagu caddeeyo dembiga
- U oggolaanshaha qofka dhibbanaha ah in uu wax ka ogaado go’aanka wax xidhida ama qoraalka ku xadgudubka sharciga ‘citation’, iyo waxa la filayo ee xiga
- Qorida warbixinta booliska, oo ay ku jirto luqadda saxda ah ee ay ka dambeysay eexda (oo ah xigashooyin) ama hab-dhaqanka oo la tilmaamay
  - Warbixinnada boolisku waa in aysan ku jirin waxyaabo guud ‘generalities’ sida “Bob ka dib wuxuu isticmaalay **aflagaado jinsiyadeed** si uu u caayo Maria.”
- La talinta dhibbanayaasha fal dembiyeedka ee xuquuqda dhibbanaha dembiga

# Su'aalaha ku saabsan Ujeedada ka Dambeysa Dembiga

- Boolisku waxay ku weydiin doonaan haddii aad aaminsan tahay in dembiga ay dhiirigelisay eex.
- Boolisku waxay ku weydiin doonaan haddii aad hayso caddenta ujeedada ka dambeysa eexda.
- Boolisku waxay wax kaa weydiin doonaan luqad gaar ah oo la adeegsaday, oo ay ku jiraan caydu.
  - Tani ma aha in lagu ceebeeyo ama waxyeelo laguu geysto, laakiin taasi beddelkeeda la soo ururiyo caddeynta lagama maarmaan u ah si loo caddeeyo dembi gaar ah.
- Waxaa dhici karta in boolisku ku weydiiyaan wax eray gaar ah—sida cay—ka dhigan tahay.
  - Tani ma aha iyada oo sababtu tahay in aysan aqoon macnaheeda, laakiin taasi beddelkeeda waxay lagama maarmaan u tahay caddeynta ujeedada suurtagalka ah ee ka dambeysa eexda.

# Dabaqad La dhowrayo ee Dhabta ah ama Loo arko?

- Ujeedada ka dambeysa eexda dembiiluhu ma aha in la waafajiyo aqoonsigaaga.
- Sharciga Oregon ayaa u baahan caddeynta "sida loo arko" dabaqad la dhowrayo, ma aha dabaqada la dhowrayo oo dhab ah.
- Tusaale ahaan, qof wuxuu weerari karaa qof dhibbane ah oo ugu wici kartaa aflagaado ka dhan ah Madow/Maraykanka Madow. Haddii qofka dhibbane ahi isku aqoonsan in uu yahay mid U dhashay Hawaii, dembiga eexda jinsiyadeed ku saleysan jinsiga ayaa weli la isku soo oogi karaa.

# Macluumaadka Dabaqada La Dhowrayo

Boolisku waxay wax kaa weydiin doonaan macluumaadka dabaqada la dhowrayo.

Tani waxaa ku jira:

- Jinsiga
- Aqoonsiga jinsi ahaaneed
- Midabka
- Diinta
- Dookha galmo
- Naafanimada
- Dalka Laga soo jeedo*

*Boolisku kuma weydiin karo xaaladaada muwaadinimo, dalka aad ka soo jeedo, ama xaaladaada muhaajirnimo, haddii aysan ahayn **mid looga baahan yahay** baaritaankooda dembiga gobolka ama degaanka (ORS 181A.823).

# Boolisku kuma qasbana in ay Baaraan Dhacdada *Eexda*

- Oregon DOJ waxay ku talinaysaa in booliisku uu baaro oo diiwaanka geliyo warbixinta booliska ee dhammaan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda.
  - Dhacdooyinka eexdu waa erayo **aan dembi ahayn** oo ay ka dambeysay eexi ama fal lagu beegsanayo qofka iyada oo lagu saleynayo sida dabaqadooda la dhowrayo loo arko.
- Si kastaba ha ahaatee, boolisku ***kuma*** qasbana in ay baaraan ama diiwaanka geliyaan dhacdooyinka eexda.
- Boolisku waa inay dhibbanayaasha dhacdooyinka eexda u gudbiyaan adeegyada dhibbanaha ee degaanka oo loo qalmo ama Khadka Ka Jawaabida Eexda (ORS 147.380).

# Boolisku Macluumaadkaada Lama Wadaagi karaan ICE

- Haddii aysan ku qasbaynin amar uu saxiixay qareen, ama wadaagida macluumaadku uu horeba u ahaa mid dadka u furan oo la heli karo, boolisku macluumaadkaaga dalka aad ka soo jeedo, muwaadinimadaada, ama xaaladaada muhaajirnimo lama wadaagi karaan maamulka socdaalka ee federaalka iyada oo ujeedada laga leeyahay tahay hirgelinta sharciga socdaalka ee federaalka (ORS 181A.823).

Ma rabtaa inaad ogaato waxa ay damacsan tahay Qaybta Xuquuqda Madaniga ah? Nagala soco warbaahinta bulshada!

Oregon Department of Justice's
CIVIL RIGHTS UNIT